Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JAN-FEB

# 2026

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.191** **Taariikh: 27 Dec, 2025**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA BUUGGA BADMAAXA SOOMAALIYEED**

XRW - BIXIT
27 DEC 2025
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 203 ee Sharciga Badda (Sharci Lr. 5/1989).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **XW/WDGB /119/25** ee ku taariikheysan **18/11/2025** ee Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.36.139.12.25** ee **18/12/2025,** kuna saabsan **Ansixinta "Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Badbaadinta nolosha iyo hantida Badmaaxiinta Soomaaliyeed .

**Wuxuu Meelmariyay**

**Qodobka 1aad**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW. 36.139.12.25** ee **18/12/2025,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2aad**

**Hirgalin**

Waxaa Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

**Qodobka 3aad**

**Dhaqangal**

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HaII-004-2026
TAARIIKH : 31-01-2026
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

# JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA DEKADAHA IYO GAADIIDKA BADDA

# XEER-NIDAAMIYAHA BUUGGA BADMAAXA SOOMAALIYEED

**MUQDISHO – SOOMAALIYA**
**2025**

## Qodobka 1aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabayaa "**Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed"**

## Qodobka 2aad:Ujeedada iyo Baaxadda

1. Ujeeddooyinka Xeer-nidaamiyahan waa sida hoos ku xusan:
   (a) Dejinta habraacyada iyo shuruudaha lagu maamulayo diiwaangelinta badmaaxiinta Soomaaliyeed.
   (b) Nidaaminta Daabacaadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed(BBS)
   (c) Unkidda nidaam qaran ee aqoonsiga badmaaxa oo la jaanqaadaya Xeerarka Qaran iyo kuwa caalamiga.
   (d) Qeexidda waajibaadka iyo xuquuqda badmaaxiinta
2. Xeerkan wuxuu khuseeyaa oo lagu dhaqayaa:
   (a) Badmaaxiinta ka shaqeeya maraakiibta ku diiwaangashan calanka Soomaaliyeed, sida lagu qeexay Sharciga Badda ee Lr.5 ee 1989.
   (b) Muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ka shaqeeya maraakiib kale balse u baahan caddayn xirfadeed oo rasmi ah.
   (c) Marna lama oggola qof badmaaxi ah inuu ka shaqeeyo Markab ama ku lug yeesho arrimaha badmaaxidda asiga oo aanan haysan aqoonsiga rasmiga ee Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.
3. Dadka ka reebban ee aanan qaadan karin Buugga Badmaaxa:
   (a) Xeerkan laguma dabaqayo qof kasta oo aan ka tirsaneyn shaqaalaha badmaaxiinta Soomaaliyeed ama dadka uu ka reebay Qodobka 35aad ee Sharciga Badda Soomaaliyeed ee Sharci Lr. 5 ee 1989.

## Qodobka 3aad: Qeexid

Erayada soo socda waxay leeyihiin macnaha ku hor qoran:

(a) **Badmaax**: waxaa loola jeedaa shaqsi leh khibrad uu uga shqeyn karo ama uga hawlgalo gaadiid badeed dushiisa si sharci ahna uu xaqiijiyo badqabka, badbaadada gaadiid badeedka, shaqaalaha iyo hantida saaaran, shaqadoodana waa ku kala duwan tahay gaadiid badeedka dushiisa.

(b) **Buugga Badmaaxa**: waxaa loola jeedaa Aqoonsiga rasmiga ah ee Badmaaxa Soomaaliyeed, waana dokumenti muhiim ah oo caddeynaya xirfadda, darajada iyo waayo-aragnimada badmaaxa si waafaqsan shuruucda dalka iyo kuwa caalamiga ah.

(c) **Sharciga Badda**: waxaa loola jeeda Sharciga Badda Soomaaliyeed sharci Lr.5 ee 1989.

(d) **Wasiir**: waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

(e) **Agaasimaha Guud**: waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

(f) **Waaxda Maamulka Badda**: waa Waaxda loo idmaday Maamulka Arrimaha Badda Soomaaliya kana tirsan Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

(g) **Kabtan**: waxaa loola jeedaa qofka haysta shahaado Jaamacad badeed, lehna khibrad badeed oo aan ka yareyn 10 (toban) sano loona doortay hoggaanka markabka.

(h) **Sarkaal**: waxaa loola jeedaa qof ka mid ah shaqaalaha markabka oo aan ahayn kabtanka, buuxiyeyna heerarka waxbarashada iyo tababarrada Badda ee Maraakiibta dushooda, sidoo kalena haysta magacaabis rasmi ah ee loo cuskaday Xeer-Nidaamiyahan, Sharciga Badda, iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya dhinac ka tahay.

(i) **Diiwaangelin**: waxaa loola jeedaa habka lagu xaqiijiyo in badmaaxu buuxiyo shuruudaha lagama-maarmaanka ah ee uu ku heli karo buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

(j) **NIRA**: waxaa loola jeedaa Soo gaabinta ereyada ingiriisiga ee ah sida tan (National Identification&Registration Authority) oo afsoomali ku noqotay Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwangelinta Qaranka ee u idman bixinta iyo daabacaadda Kaarka Aqoonsiga Qaranka.

(k) **BBS**: Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

## Qodobka 4$^{aad}$: Maamulka iyo Fulinta

1. Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda, gaar ahaan Waaxda Maamulka Badda oo raacaysa tilmaamaha Madaxda/Hoggaanka Wasaaradda ayaa fulineysa habraacyada uu qeexayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale la xariira arrimaha Badmaaxiinta Soomaaliyeed.

2. Xafiiska diiwaangelinta ee Waaxda Maamulka Badda ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ayaa u xilsaaran Waajibaadkan:

    (a) Qabashada Codsiga Badmaaxa iyo hubinta saxnaanta iyo sugnaanta xogta si waafaqsan habraacyada Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Badda Soomaaliyeed.

    (b) Diiwaangelinta iyo cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.

    (c) Keydinta iyo ilaalinta xogta Badmaaxiinta Soomaaliyeed.

    (d) Xuquuda badmaaxa

    (e) Diyaarinta warbixnno muddeysan oo joogto ah iyo kuwo gaar ahba hadba sidii looga dalbado xafiiska.

    (f) Diiwaangelinta dhammaan fasaxyada, socodsiinta, iyo wareejinta badmaaxiinta

3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda wuxuu soo saari karaa tilmaamo iyo habraacyo farsamo oo lagu jiheynayo diwaangelinta iyo daabacaadda BBS asagoo kala tashanaayo wasiirka Wasaaradda,sidoo kalena waxa uu si joogta ugu korjoogteynayaa waaxda Maamulka Badda fulinta iyo dhaqangelinta Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 5$^{aad}$: Shuruudaha Helitaanka Buugga Badmaaxa

Qof kasta oo doonaya in la siiyo Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

(a) Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed.

(b) Waa in da'diisu tahay ugu yaraan 18 sano.

(c) Waa inuu caafimaad qabo oo fiyow yahay, haystana shahaado caafimaad oo ka timid dhakhtar ama isbitaal caafimaad oo la aqoonsan yahay, gaar ahaan dhinacyada aragga, maqalka, iyo awoodda shaqo.

(d) Waa inuu leeyahay aqoonta asaasiga ee culuumta badda iyo badmaridda, sidoo kalena haystaa shahaadooyin tababar aasaasi ah sida ku cad Shraciga Badda Soomaaliyeed soona gudbiyaa dhamaan caddeymaha iyo docukentiyada la xariira arrimahan aqoonta iyo tababarrada ee ku xusan qodobkan.

(e) Waa inuusan ahayn qof hore loogu xukumay dambiyo la xiriira hanti, amni, ama falal dambiyo-badeed (maritime-related offenses).

(f) Waa inuu yaqaanno dabbaasha.

(g) Waa inuu leeyahay/haysto kaarka aqoonsiga Qaranka (NIRA) ama baasaaboor.

## Qodobka 6aad: Habraaca Codsiga iyo Qaadashada Buugga Badmaaxa

Qofka badmaaxa ah ee doonaya inuu helo/qaato Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxa uu marayaa habraaca hoos ku xusan:

(a) Soo gudbinta codsi rasmi ah ee la xariira dalabka Buugga Badmaaxa

(b) Buuxinta iyo soo gudbinta foomka codsiga (application form) ee Wasaardda ee la xariira dalabka buugga Badmaaxa.

(c) Soo gudbinta shahaado caafimaad-qab oo goordhow ah taas oo muujineysa in Badamaaxuhu uu fiyow yahay gaar ahaan aragga iyo maqalka sida ku cad Xeerka Badda Soomaaliyeed Lr.5 ee 1989.

(d) Soo gudbinta aqoonsi Qaran sida Baasaboor ama Kaarka Aqoonsiga Qaranka ee NIRA.

(e) Bixinta kharashka diiwaangelinta

(f) Soo gudbinta (2) sawir oo muddo dhow ah.

## Qodobka 7aad: Daabacaadda iyo Tilmaamaha Buugga Badmaaxa

1. Buuggaa Badmaaxa Soomaaliyeed waa dokument rasmi ah oo ay bixiso Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS oo nidaaminaya howsha badmaaxidda iyo qofka badmaaxa ahba lehna ujeeddooyinka soo socda:
    (a) Buuxinta waajibaadka Qaran ee la xariira bixinta aqoonsinsiga Badmaaxaha Soomaaliyeed

(b) Diiwaangelinta Badmaaxiinta Soomaaliyeed iyada oo la ilaalinayo habraacyada iyo shuruudaha ku xusan Xeer-nidaamiyahan si haystuhu u noqdo badmaaxe si sharci ah loo diiwaangeliyay.
(c) Caddeynta aqoonta, khibradda, darajada, iyo taariikhda shaqo ee badmaaxaha Soomaaliyeed.
(d) Fududeynta socdaalka/Safarka Badmaaxaha Soomaaliyeed iyo kor u qaadista kalsoonidda badmaaxiinta iyo fursadaha shaqo helidda.

2. Buuga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa hagaya oo lagu bixinayaa si waafaqsan shuruucdan hoos ku xusan gaar ahaan qodobada khuseeya aqoonsiga iyo diiwaangelinta badmaaxiinta:
    (a) Xeer-nidaamiya Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed.
    (b) Sharciga Badda Soomaaliyeed (Sharci Lr.. 5 1989).
3. Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS ayaa mas'uul ka ah daabacaadda, bixinta, hakinta ama joojinta Buugga Badmaaxa sida ku xusan Sharciga Badda Soomaaliyeed ee sharci Lr.5 ee 1989.
4. Buugga Badmaaxa waa hanti dawladeed, waxaana loo isticmaali karaa oo keliya ujeeddooyin xirfadeed iyo shaqo oo waafaqsan shuruucda badda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa lagu muujinayaa oo lagu qorayaa macluumaadka aasaasiga ah ee soo socda:
    (a) Faahfaahinta Aqoonsiga Shaqsiga ah sida: Magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga, sawirka, darajada iyo lambarka aqoonsiga.
    (b) Lambarka rasmiga ah ee buugga iyo taariikhda bixinta.
    (c) Taariikhda Shaqada Badda (Sea Service Record): Faahfaahinta shaqo ee markab kasta oo uu badmaaxu ka shaqeeyay, oo ay ku jiraan magaca markabka, nooca shaqada, iyo muddada shaqada.
6. Waqtiga jiritaanka buuggu waa 5 (shan) sano, kaddib wuu dhacayaa oo waxaa waajib ah in la cusboonaysiiyo.
7. Hab-qoraalka Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed wuxuu ka koobnaanayaa laba qeybood oo rasmi ah:
    (a) Qeybta Aqoonsiga Shaqsiga ah iyo
    (b) Qeybta Taariikhda Shaqada Badda ee Badmaaxaha
8. Qaabka, naqshadda iyo heerarka amni (Security Features) ee daabacaadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa go'aaminaya Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

9. Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa in lagu daabacaa oo lagu maamulaa si waafaqsan heerarka ilaalinta xogta, lana adeegsadaa walxo ammaan ah oo ka hortagaya been-abuurka iyo isticmaalka sharci-darrada ah.
10. Dokumentigan (Buugga badmaaxa) lama wareejin karo, lama beddeli karo, lagamana dhigi karo dokumenti ganacsi ama dammaanad (collateral).
11. Qof ama badmaax kasta oo si sharci-darro ah u helo, isticmaala, beddela, ama been-abuura Buugga Badmaaxa, tababaradda, ama shahaadooyinka wuxuu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Xeerarka iyo Shuruucda Dalka.

## Qodobka 8aad: Cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed

1. Shuruudaha iyo habraaca cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxa ay la mid yihiin shuruudaha ku xusan Qodobka 5aad ee Xeer-nidaamiyahan.
2. Badmaaxuhu waxa uu soo codsan karaa cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa 6 bil ka hor waqtiga dhicitaanka Buugga.
3. Codsiga cusboonaysiinta Buugga Badmaaxa waxaa loo soo gudbinayaa Xafiiska Diiwaangalinta ee Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda iyada oo lagu soo lifaaqayo dhamaan dokumentiyadaya iyo caddeymaha lagama-maarmaanka u ah howsha cusbooneysiinta buugga iyo shaqada Badmaaxaha.

## Qodobka 9aad: Joojinta ama Kala-noqoshada Buugga Badmaaxa

1. Buugga Badmaaxa waxaa lagala noqon karaa ama la joojin karaa badmaaxaha haddii:

   (a) Badmaaxu ku guuldarraysto gudashada waajibaadkiisa
   (b) Badmaaxu ku xad-gudbo Xeer-nidaamiyaha Buugga Badmaxa Soomaaliyeed ama Sharciga Badda Soomaaliyeed.
   (c) La helo caddeyn caafimaad oo muujinaysa in codsaduhu uusan u qalmin shaqada badda.
   (d) Shahaadooyinka ama tababarada uu haysto aysan sax ahayn ama kala dhiman yihiin
   (e) Lagu xukumo dembiyo lid ku ah hantida, badbaadada, ama nolosha dadka.
   (f) Lagu helo caddeyn khatar amni ama badbaado la'aan markabka.
   (g) Ka tagidda shaqada markabka ama raacista la'aanta waajibaadka badmaaxnimo ee habraaca.

(h) Luminta, xatooyada, ama been-abuurka Buugga Badmaaxa.

2. Ka joojintu waa inay noqotaa mid qoraal ah oo la diiwaangeliyay, waxaana go'aanka joojinta soo saaraya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda asiga oo tixraacaya warbixinta xafiiska diiwaangelinta ee Wasaaradda, qofka badmaaxa ahna waxaa la siinayaa qoraal sharraxaya sababta.

3. Qofka Buugga laga joojiyey ama lagala noqday wuxuu codsan karaa dib-u-bixinta Buugga haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha isla markaana uu keeno dokumentiyo lagu qanco.

## Qodobka 10aad: Tirtiridda Buugga Badmaaxa, iyo Ka hortagga Been-abuurka

1. Badmaaxiinta waxaa laga tirtirayaa diiwaannada rasmiga ah, Buugga Badmaaxiintana waa lagala noqonayaa haddii ay jiraan sababaha hoos ku qoran:

   (a) Haddii Badmaaxaha ku qoran diiwaanka uu geeriyoodo/dhinto;
   (b) Codsigiisa;
   (c) Haddii Badmaaxu lumiyo ama waayo Jinsiyadda/Dhalashada Soomaaliyeed
   (d) Waayidda joogtada ee caafimaad ahaan taas oo ku saabsan badmaridda.
   (e) Lagu dhawaaqo xukun kama-dambeys ah inuu galay dambi ama xadgudub halis ah.
   (f) Si kas iyo ula kac ah uu u diido amarrada sharciga ah ee uu bixiyay Kabtanka Markabka ama Sarkaal kale ee haya hoggaanka.

2. Dadka laga tirtiro waxay dib u codsan karaan Buugga marka sababihii tirtiridda ay dhammaadaan.

3. Tirtiridda waa in la diiwaangeliyaa iyadoo la hubinayo waafaqsanaanta Xeer-nidaamiyahan, Sharciga Badda Soomaaliyeed.

4. Xafiiska diiwaangelinta Wasaaradda waxaa waajib ku ah ka hortagga been-abuurka Buugga Badmaaxa, xatooyada ama isticmaalka sharci-darrada ah iyo wax-ka-beddelka shahaadooyinka iyo macluumaadka diiwaanka.

## Qodobka 11aad: Waajibaadka Badmaaxa

1. Qof kasta oo haysta Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waxaa waajib ku ah inuu:
   (a) Haysto buugga mar kasta oo uu ku sugan yahay markab ama uu ku jiro hawl badeed.
   (b) Ilaaliyo buugga iyo macluumaadka ku qoran si ammaan ah.

(c) Kusoo wargeliyo isla markiiba Wasaaradda haddii buuggu lumo, xumaado, ama la xado.
(d) Ka fogaado isticmaalka ama gudbinta aan sharciga ahayn ee Buugga Badmaaxa.
(e) Ilaalinta habraacyada badmaridda iyo nidaamyada amni ee shaqada badda.
(f) U hoggaansamo shuruucda badda, amarrada kabtanka, iyo tilmaamaha la xariira badmaaxidda ay soo saarto Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

2. Badmaaxu waa inuu fuliyo dhammaan waajibaadka sharci sidoo kalena dhowro waajibaadka shaqo ee lagula heshiiyay, waana inuu ilaaliyo badbaadada markabka iyo shaqaalahaba sidoo kalena ka qeybqaato qaadashada tababarrada hormarinta xirfadda Badmaaxa.
3. Ku xadgudubka qodobada waajibaadka badmaaxa ee uu xusayo Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu muteysanayaa ciqaab waafaqsan Sharciga Badda Soomaaliyeed.

## Qodobka 12aad: Ilaalinta Xuquuqaha iyo Amniga Badmaaxiinta

1. Buugga Badmaaxa waa caddeyn rasmi ah oo muujinaysa aqoonsiga badmaaxiga iyo xuquuqihiisa shaqo ee la aqoonsan yahay.
2. Shaqsi kasta oo mas'uul ka ah maamulka ama shaqada badmaaxiinta, oo ay ku jiraan milkilayaasha markabka, kabtannada, iyo shaqaalaha diiwaangelinta ee Waaxda Maamulka Badda, waa inuu:

   (a) Ilaaliyo xuquuqda shaqo iyo mushaharka badmaaxiinta.
   (b) Damaanad qaado badbaadada iyo caafimaadka shaqaalaha badda.
   (c) Ka hortago xadgudub, tacaddi, ama khiyaano kasta oo la xiriira shaqada badmaaxnimo.

3. Badmaaxiintu waxay xaq u leeyihiin fasaxa nashaadka (shore leave) iyadoo la raacayo:

   (a) Shuruucda amniga markabka.
   (b) Jadwalka shaqada markabka.
   (c) Xeerarka gudaha ee dekedaha iyo shuruucda soo gelitaanka dalka.

4. Badmaaxu wuxuu xaq u leeyahay mushahar waafaqsan heshiiska shaqada iyo Xeerarka nidaayimaya arrimaha badmaaxiinta, waxbarasho iyo tababar joogto ah, iyo ilaalinta xuquuqdiisa shaqo, caafimaad, iyo badbaado.
5. Badmaaxu wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado baaritaan sharci oo ka dhan ah xadgudub kasta oo lagu sameeyo shaqadiisa ama lagula kaco badmaaxa naftiisa.

## Qodobka 13aad: Ciqaabta iyo Ganaaxyada

1. Qof kasta oo sifo aan sharci aheyn u soo saara/sameeya ama u adeegsada Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed, la yimaada ama sameeya been-abuur, ka been sheega xogta la xiriirta aqoonsiga shakhsiyadeed ama shahaadooinka waxbarasho waxaa loo aqoonsanayaa inuu la yimid fal dambiyeed, waxuuna muteysanayaa ciqaab si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
2. Ciqaabta iyo ganaaxa waxa ay noqon karaan:
   (a) Ganaax lacageed oo aan ka yareyn $350 kana badneyn $2,400.
   (b) Mamnuucid ku-meel-gaar ah ama joogto ah ee hawlaha badda.
3. Shirkadaha, milkiilayaasha maraakiibta, ama loo shaqeeyayaasha lagu helo inay ku xadgudbeen xuquuqda badmaaxiinta, oo ay ka mid yihiin musuqmaasuq, hoos u dhigista mushaharka, ka hortagga xuquuqda shaqada iyo badbaadada, ama tacaddi kale, waxay la kulmayaan ciqaab adag oo ay ka mid tahay:
   (a) Magdhaw iyo ganaax lacageed oo gaari kara ilaa $10,000 (toban kun oo doolar), oo lagu dabaqo shirkad kasta ama milkiilaha markabka.
   (b) Xannibaadda markabka
   (c) Xayiraad ku meel gaar ah ama joogto ah oo ku saabsan hawlaha badda ama ka qeybgalka ganacsiga maraakiibta Soomaaliya.
4. Ciqaab kasta waa in si cad loo diiwaangeliyaa oo lagu qoraa keydka/diiwaanka badmaaxiinta, laguna fuliyo ciqaabaha iyadoo la raacayo Sharciga Badda Soomaaliyeed, iyo Xeer-nidaamiyahan si loo xaqiijiyo hufnaanta, waafaqsanaanta sharci, iyo ilaalinta xuquuqda badmaaxiinta
5. Ciqaab kasta oo ka baxsan qodobada aan kor ku soo sheegnay amaba aanan ku xusneyn Xeer-nidaamiyahan, waxaa loo cuskanayaa Xeerka Badda Soomaaliyeed ama Xeerarka Ciqaabeed ee Dalka.

## Qodobka 14aad: Khidmadaha(Lacagta) Buugga Badmaaxa

1. Lacagta laga qaadayo codsadaha Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed waa sida shaxda hoose ku xusan.

| Lr | Nooca Khidmadda Buugga Badmaaxa Soomaaliyeed | KHARASHKA (USD) |
|---|---|---|
| 1 | Khidmada Codsiga iyo Diiwaangelinta | $25 |
| 2 | Daabacaadda/Cusbooneysiinta Buugga Badmaaxa | $130 |

2. Marka laga tago khidmadda ku qoran Xeer-nidaamiyahan, dhammaan khidmadaha kale ee soo haray ee la xariira arrinkan sida shahaado-siinta, tabarrada iyo ganaaxyadaba waxaa Xeer Wasiir oo gaar ah ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda ee JFS.

## Qodobka 15aad: Dhanqangal

Xeer-nidaamiyahani waxa uu dhaqangeliyanaa marka Golaha Wasiirradu ay meelmariyaan, Ra'iisul Wasaaruhuna uu qaraar ku soo saaro, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah Dawladda.